

Su'alaha Badanaa La Isweydiyo ee Kaalmada Aafada ee Daryeelka Carruurta ee EBT (P-EBT)

Sanad dugsiyeedka 2022-2023 (Maarso 31, 2023)

Su'aasha 1: Waa maxay P-EBT ga Daryeelka carruurta?

Jawaab: waa gunnada cuntada ku meel gaarka ah oo ay dawlada federaalku ansixisay si loo caawiyo qoysaska ay u joogaan carruurta ka yar 6 sano inta lagu jiro aalada COVID-19.

Su'ussa 2: Qofkee u qalma gunnooyinka P-EBT ee Daryeelka carruurta?

Jawaab" Qoysaska Vermont ee qaata gunnooyinka 3SquaresVT ayna u joogaan ilmo kayar lix sano. Gunnooyinka P-EBT ee Daryeelka Carruurta ayaa la bixin doonaa bil kasta laga bilaabo Sibteembar 2022 ilaa Maayo 11, 2023 lana siin doonaa qoysaska u qalma. Gunnooyinka P-EBT ee Daryeelka Carruurta ayaa ku eg Maayo 11 sabab la xiriiirta inay dhamaanayso xaalada degdega ah ee caafimaadka dadwaynaha ee federaalku.

Su'aasha 3: Waa meeqa gunnada P-EBT ee Daryeelka Carruurta?

Jawaab: Gunnada P-EBT ee Daryeelka Carruurta waa \$34.79 calaa cunug bil kasta mudada u dhexaysa Sibteembar 2022 - Janaayo 2023. Qiimaha Feebaraayo - Maayo 11 ayaan wali la xisaabin. Qiimaha daryeelka carruurta ee Maayo ayaa noqon doona qiimo horey loo xisaabshay sabab la xiriiirta in gunnooyinku dhammaan doonaan bartamaha bisha.

Su'aasha 4: Ma jirtaa gunnada P-EBT ee Daryeelka Carruurta xiliga Xagaaga?

Jawaab: Maadaama xaalada degdega ah ee caafimaadka dadwaynaha ee federaalka la mudeeyay inay dhammaato Maayo 11, ma jiri doonto gunnada P-EBT ee Daryeelka Carruurta xiliga xagaaga. Sharciga federaalka ayaan u ogolayn Vermont inay bixiso gunnada P-EBT ee Daryeelka Carruurta marka xaalada degdega ah ee caafimaadka dadwaynuhu dhammaato.

Su'aasha5: Goorma ayaa la bixin doonaa gunnada P-EBT ee Daryeelka Carruurta?

Jawaab: Wareegga koobaad ee gunnooyinka (Sibteembar 2022 – Janaayo 2023) waxaa la bixin doonaa dhammaadka Abriil 2023. Carruurta u qalma gunnada P-EBT ee Daryeelka Carruurta ayaa heli doona hal lacag oo gunnada ah bilaha Sibteembar ilaa Janaayo bil kasta oo qoysku helay gunnooyinka 3SquaresVT.

Gunnooyinka bilaha Febraayo - Maayo 11 ayaa la qorsheeyay in la baxsho dhammaadka Agoosto.

Su'aasha 6: Sidee ayaan ku ogaanayaa in qoyskaygu u qalmo?

Jawaab: Waaxda Adeegyada Dhaqaalaha (ESD) ayaa go'aamin doonta haddii cunugaagu u qalmo, ayadoo laga eegaayo shuruudaha kore. Haddii aad u qalanto, waxaad waraaq ka helaysaa ESD taasoo sharxaysa sida iyo goorta aad helayso gunnada.

Su'aasha 7: Haddii aan u qalano, sidee ayaan ku helaynaa gunnooyinka?

Jawaab: Gunnooyinka P-EBT ee Daryeelka Carruurta ayaa lagu shubaa hal kaarka EBT ah kaasoo la siiyay qoyskaaga si uu ugu qaato gunnada 3SquaresVT.

Su'aasha 8: Masuuliyada waalid ee ardaygayga ayaa u kala qaybsan labo qoys. Qoyskee helaaya gunnada?

Jawaab: Gunnada ayaa loo diri doonaa qofka wayn ee ku qoran 3SquaresVT inuu yahay madaxa qoyska waxaana u diraysa ESD.

Su'aasha 9: Maxaan ku iibsanaa karaa gunnadaan?

Jawaab: ka fiiri [liiska cuntooyinka u qalma](#) webseedka USDA.

Su'aasha 10: Xagee ayaan ku adeegsan karaa kaarkayga EBT?

Jawaab: Waxaad u adeegsan kartaa inaad uga iibsato cuntooyinka u qalma mid uun ka mid ah xarumaha aqbala 3SquaresVT. Tan waxaa ku jira dukaannada adeegga, suuqyada adeegyada guud, dukaannada xaafadaha, iyo suuqyada beeraleeyda oo badan kuna yaala Vermont. Xog dheeri ah ka fiiri webseedka DCF ee [EBT](#).

Su'aasha11: Carruur iima dhigato xarunta daryeelka ilmaha. Miyaan helayaa gunnadaan?

Jawaab: Haa. Dhammaan carruurta kayar lix sano ee hela gunnada 3SquaresVT ayaa u qalma.

Su'aasha12: Waxaa ii jooga ilmo kale oo ka waawayn lix sano. Miyay u qalmaannada gunnada P-EBT ee daryeelka Carruurta?

Jawaab: Maya. Gunnada waxaa keliya u qalma carruurta qaata gunnooyinka 3SquaresVT kana yar lix sano jir. Fadlan akhri su'aalaha Badanaa La Isweydiiyo ee P-EBT ga Dugsiga si aad u hesho xog dheeri ah oo ku saabsan gunnooyinka ay heli karaan ilmaha da'da dugsiga.

Su'aasha13: Ka waran haddii aanan doonayn gunnadaan?

Jawaab: Ka qaybgalku waa ikhtiyaari. Haddii aadan doonayn inaad ka qaybgasho, ha adeegsan gunnooyinka dheeriga ah ee lagugu siiyay kaarkaaga EBT ee 3SquaresVT.

Su'aasha14: Gunnooyinka P-EBT ma dhacayaan haddii aan la isticmaalin?

Jawaab: Haa. Gunnooyinka P-EBT ayaa dhacaaya haddii kaarka aan la isticmaalin 274 maalmood gudahood.

Su'aasha15: Waxaan qabaa su'aalo dheeri ah. Xagee ayaan ka helaysaa xog dheeri ah?

Jawaab: Booqo <https://dcf.vermont.gov/esd/P-EBT> ama wac 1-800-479-6151 dookha 7 si aad u hesho xog dheeraad ah.